



**Soo kabashadu waa
bulsho dad ah oo
soo maray halka
aad ku sugan tahay,
halkaasna kuu
joogi doona.**



**Xog badan ka ogow
WAFriendsForLife.com**

**SOO KABASHADU
WAA SUURTAGAL.
MOUD
AYAA KAA
CAAWIN KARTO.**



**Soo kabashadu waxay u baahan
tahay dhiiranaan, isku xir,
iyo daaweyn.**

**MOUD, ama daawooyinka balwadda
isticmaalka opioid, waxay kor
uqaadaan fursadaha soo kabasho
badbaado ah oo guul leh.**

MOUD & SOO KABASHADA

Daawooyinka MOUD waa kuwo badbaado ah oo waxtar u ah in lagu daaweeyo dadka qaba balwadda isticmaalka opioid (OUD). Waxay dadka ka caawiyaan dib-u-dhiska noloshooda iyo cilaaqaadka.

Iyada oo ay wehliso taageerada saaxiibada, qoyska, iyo xirfadlayaasha daaweynta, MOUD waxay dadka ka caawiyaan in ay si badbaado ah u soo kabtaan.

MAXAA AY SAMEEYAAN DAAWOYINKA MOUD?

Waxay caadi ka dhigaan
kimistariga maskaxda

Waxay meesha ka saaraan
ku haminta

Waxay yareeyaan ama ka hortagaan
calaamadaha iska joojinta

Waxay khatarta iska tan
badinta hoos u dhigaan 50%

DAAWOYINKA MOUD EE DHALINYARADA IYO DA' YARTA

MOUD waa daryeelka caadiga ah ee loogu talagalay dadka da' kasta ee ku jira soo kabashada. Dhalinyarada iyo da' yarta ee qaba balwadda OUD waa in la siiyaa MOUD oo ka qeyb ah qorshaha daaweynta.

Haddii aad qabto su'aalo, iimayl u dir
youthmoud@hca.wa.gov

METHADONE & BUPRENORPHINE

Methadone iyo buprenorphine waa daawooyin aad waxtar u ah oo loo heli karo dadka da' kasta ee qaba balwadda OUD.

Methadone

- Kuuro maalinle ah
- Kuuro afka laga qaato, waxay jirka ku jirtaa 24 saac
- Waa in lagu bilaabaa barnaamij shahaadaysan oo daaweynta opioid-ka ah
- Kuurooyinka guriga lagu qaato ayaa laga yaabaa in la oggolaado

Buprenorphine

- Xulashooyin kuuro oo ah maalinle, toddobaadle, ama bille
- Kuurada afka ah waxay jirka ku jirtaa 24 saac; kuurada la isku duro waxay jirka ku jirtaa 28 maalmood
- Waxaa lagu bilaabi karaa xafiis dhakhtar ama barnaamij shahaadaysan oo daaweynta opioid-ka ah
- Daawo qorista guriga loo qaato ayaa la heli karaa

TAAGEERIDDA SAAXIIBKA EE SOO KABASHADA

Garab joog

Soo kabasho kasta waa mid gaar ah, laakiin dhamaantood waxay u baahan yihiin isku xir. Marka dadka ay taageero ka haystaan saaxiibada iyo qoyska, waxay u badan tahay inay ku sii jiraan soo kabashada.

Wado naloxone

Ku laabashada waxay qeyb ka noqon kartaa soo kabashada, iska tan badintana ayaa aad u badan kadib marki muddo aan la isticmaalin daroogada opioid-ka. Wado naloxone, haddii aad la kulanto. Waxay badbaadisaa nolosha waxayna ka dhigtaa soo kabashada joogtada ah mid suurtagal ah.

Waxbadan ka ogow

Akhri hagahan daaweynta opioid-ka ee loogu talagalay bukaanada, saaxiibada, iyo qoyska oo ay abuurtay American Society of Addiction Medicine (Bulshada Maraykanka ee Daawaynta Qabatinka).

